



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

Adeegga Negeeye

Su'aal iyo Jawaab

1. Waa maxay Adeegga Negeeye?

Adeegga Negeeye waa barnaamij ay hindistay oo hirgelisay Safaaradda Soomaaliyeed ee Ankara. Waa aalad u suurtagelinaysa in safaaraddu si sahlan ugu adeegto bulshada uga baahan adeegyada kala duwan; sida adeegyada Qunsilayadda iyo samaynta ama cusboonaysiinta baasaboorrada.

Negeeye waa adeeg Internetka ku shaqaynaya. Wuxuu qofka u baahan si dhib yar u gaadhsiinayaa adeegyada Safaaraddu bixiso. Qofkii soo isticmaala Adeegga Negeeye wuxuu helayaa adeegga ama adeegyada uu dalbaday isaga oo gurigiisa jooga, oo aan u soo safrin Safaaradda meel kasta oo uu ka degganyahay dalka Turkey iyo waqti walba oo uu haleelo.

2. Adeegga Negeeye muxuu soo kordhiyey?

- a. Negeeye waxaad ka dalban kartaa dhammaan adeegyada ama waraaqaha ay Safaaraddu ku gudbisoo Adeegga Negeeye ee tooska ah "Online".
- b. Adeeggani wuxuu kale oo kuu samanayaa ballanta ama waqtiga aad ku imanaysid Safaaradda, si aad u samaysatid adeegyada aan tooska ahayn, ee laga fursan waayey in qofku Safaaradda u yimaaddo; sida samaynta ama cusboonaysiinta baasaboorrada, qorista wakaaladda hantida ma guurtada ah iwm.
- c. Adeegga Negeeye wuxuu waraaqahaaga kaaga soo tasdiiqinayaa Wasaaradda Arimaha Dibadda ee Turkey. Ka dibna wuxuu kuugu soo



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

dirayaa cinwaanka (address) gurigaaga ama xafiiskaaga ee aad soo qoratay.

- d. Adeegga Negeeye wuxuu mar walba kula socodsiiyaa heerka uu marayo adeegga aad ka dalbatay safaaradda. Isaga oo kaala soo xidhiidhi doona emailka iyo telefoon numberka aad iskaga diiwaan gelisay Negeeye.
- e. Haddii aad sidaada isaga diiwaan gelisid adeegga Negeeye, waxaad heli doontaa wararka iyo fariimaha Safaaraddu dadwaynaha u soo gudbinayso.

3. Waa maxay faa'iidooyinka Adeegga Negeeye?

- a. Adeegga Negeeye wuxuu qof walba oo adeeg Safaaradda ka dalbada si fudud warqadihiisa oo asal ah "original" ugu gaynaya gurigiisa.
- b. Wuxuu ka baajinayaa qofka safarkii uu ku iman lahaa Safaaradda. Safarkaas oo dadka ku ahayd culays dhaqaale iyo dhib safar, gaar ahaan dadka ka imanaya gobollada Ankara ka baxsan.
- c. Adeegga Negeeye wuxuu Safaaradda ka fududayn doonaa culayska dadka isku soo gaadhaya Safaaradda gudaheedaha ama dibaddeeda, gaar ahaan beryahan dambe oo dhibaataada caafimaad darradu dunida ku soo korodhay.

4. Adeegga Negeeye ma la hirgelin karaa?

Adeegga Negeeye wuxuu haystaa fursado badan oo ka qayb qaadanaya hirgelintiisa, waxaana ka mid ah:

- a. Safaaradda Soomaaliyeed ee Ankara waxaa ka shaqeeya hawl-wadeenno awood u leh in ay hirgeliyaan, cillad bixiyaan kuna shaqeeyaan adeegga Negeeye.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

- b. Dalka Turkey wuxuu leeyahay nidaam sahlan oo guri iyo xafiis waliba leeyahay cinwaan loogu soo hagaagi karo. Wixii lagu soo dirana ay si toos ah u iman karaan.
- c. Sidoo kale, wuxuu leeyahay nidaam boosto oo fiican, oo waraaqaha qiime yar iyo waqti kooban ku gaadhsiin kara goob kasta.
- d. Qof kasta oo deggan dalkan Turkey, wuxuu qiime macquul ah ku heli karaa adeeg Internet oo la isku hallayn karo.
- e. Adeegga Negeeye waa adeeg isticmaalkiisa aad loo fududeeyey.
- f. Adeegga Negeeye waxaad ka isticmaali kartaa Computer iyo mobile hadba kii aad doontid.
- g. Hirgelinta Adeegga Negeeye waxaa ka mid ah in uu jiro dad caawiyeyaal ah, oo u xilsaaran in ay caawiyaan dadka u baahan caawinta. Waxaana lagala xidhiidhi karaa telefoonayda:
- Caawiyaha WhatsApp (+90 537 640 65 41)
 - Cillad-bixiyaha WhatsApp (+90 534 593 39 90)
 - Email: iyo email: adeegga.negeeye@gmail.com
- h. Negeeye waa adeeg la kobcin karo oo si dhib yar markii loo baahdo wax lagu kordhin karo.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

5. Adeegyada Safaaraddu bixiso oo dhan ma “Online” baa laga dhigay?

Adeegyada Safaaraddu bixiso intooda badan waa “Online”, waxaana laguugu soo dirayaa gurigaaga adiga oo aan u baahan in aad Safaaradda u timaadid, adeegyada aad “Online” ka ku soo dalban kartid waa kuwan hoos ku qoran:

No.	Adeegyada Tooska ah “Online”
1	Adi soyadı (Kala Saarista Magaca)
2	Caddaynta Magaca Baasaboorka
3	Warqadda Dhalashada (Doğum Belgesi)
4	Caddaynta Wax-isu Ahaanshaha Qoyska (Aile Belgesi)
5	Caddaynta Kelyo isu saarista
6	Cadeynta Doobnimada ragga keliya (Bekar Belgesi)
7	Bekar Belgesi (Warqadda caddaynta gabadhnimada – Gabdhaha keliya) –
8	Caddaynta Guurka (Evlilik Belgesi)
9	Caddaynta Xaaska (İL NÜFUS VATANDAŞLIK MÜDÜRLÜĞÜ)
10	Warqadda Wakaalashada Caruurta (Aile Vekalet Belgesi)
11	Wakaalashada Hantida Turkey Taalla (Tapu Vekalet Belgesi)
12	Wakiilashada Dacwadda
13	Caddaynta Dembi La’aanta
14	Wakiilashada u Qaadista Iqaamadda (Kimlik)
15	Wakiilashada Wareejinta Saamiyadda Shirkadaha
16	Wakiilashada Qareenka
17	Wakiilashada Shahaadooyinka & Asaasidda Shirkadaha (Turkey)
18	Adeegyada kale (Other Services)



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

Waxaa kale oo jira adeegyo kale, oo qofka u baahan uu Adeegga Negeeye ballan ka soo qabsanayo. Kadibna uu Safaraadda ku imanayo waqtiga uu siiyo Negeeye; waana kuwan hoos ku qoran:

No.	Adeegyada Ballanta lagu imanayo
1	Caddaynta Warqadda Furiinka / Laga dhintay (Dumarka keliya)
2	Wakiilashada Dhaxalka
3	Wakiilashada Shahaadooyinka & Asaasidda Shirkadaha (Soomaaliya)
4	Wakaalashada Hantida Guurtada/Maguurtada (Soomaaliya)
5	Caddaynta Shahaadada / Shatiyada Shirkadaha
6	Go Home (Warqadda Dal-ku-noqoshada)
7	Tasdiiga shahaadada Jaamacadda & Dugsiga Sare
8	Tasdiiga Shahaadada Dugsiga Dhexe & Beddelka Ardayda
9	Cusboonaysiinta baasaboorka
10	Dalabka Dalku-galka (Visa Application)

6. Qof kale adeeg ama adeegyo ma iiga dalbi karaa Adeegga Negeeye?

Haa, qof kale adeegyada aad safaaradda uga baahantahay wuu kaaga samayn karaa Adeegga Negeeye. Laakiin waxaa khasab ah in uu qofkaasi kuugu diiwaan geliyo magacaaga, lambarkaaga telefoonka, emailkaaga iyo cinwaanka ama addresska gurigaaga ee waraaqaha laguugu soo diri doono.

Haddiise ay dhacdo in uu qofkaasi kuugu diiwaan geliyo magiciisa, telefankiisa, emailkiisa iyo cinwaankiisa ogow safaaraddu adeeggaaga qofkaa kale ayay kala xidhiidhi doontaa, waraaqahaagana cinwaankiisa ayaa lagu soo diri doonaa.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

7. Adeegga Negeeye ma la jabsan karaa?

Maya, lama jabsan karo loomana soo dhici karo. Sababta oo ah degelka “website” uu ka dhisanyahay waa la adkeeyey amnigiisa. Halka ay xogtu ku uruuraysana way xafidantahay.

8. Sidee loo hubinayaa haddii cid aan xaq u lahayn ay soo dalbato adeegyada Safaaradda?

Qof kasta oo soo isticmaalaya adeeggan si loogu adeego, wuxuu soo dirayaa sawirrada aqoonsiyadiisa sida baasaboorka, kaadhka iqaamadda, bogga fiisuhu kaga yaallo baasaboorkiisa iwm. Sidaa awgeed way ku adkaan doontaa in qof aan xaq u lahayn uu soo dalbado adeegyada Saraafaradda.

9. Haddii adeegga aan soo dalbaday wax iga khaldamaan ma sixi karaa?

Haa, haddii wax kaa khaldamaan si sahlan baad u sixi kartaa ka hor inta aadan soo dirin. Haddiise aad dalabkaaga soo dirtid (Submit garaysid), adeegga ama adeegyada aad dalbatay waxba kama beddeli kartid. Sidaa awgeed isticmaalaha ayaa laga rabaa in uu iska hubiyo in adeegyadii uu u baahnaa u dhanyihiin, inta uusan soo dirin ama soo “submit” garayn dalabkiisa.

10. Sidee ku ogaan karaa khidmadda adeegga ama adeegyada aan soo dalbanayo?

Khidmadda adeegga ama adeegyada aad soo dalbatay, waxaa laguugu soo gudbinayaa isla Adeegga Negeeye dhexdiisa. Waxaad heli doontaa qaansheeg faahfaahsan oo caddaynaysa khidmadda adeegyada lagu sameeyey.

11. Xaggee baan ku bixinayaa khidmadda adeegyada aan soo dalbaday?

khidmadda adeegyada aad dalbatay xisaabta ama “Account”ka bangiga aad ku soo bixinaysid, waxay ku qorantahay qaansheegta laguugu soo diri doono isla Adeegga Negeeye gudiisa.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

12. Maxaa adeeggan loogu bixiyey “Negeeye”?

Magaca Negeeye waxaanu ku doorannay labo sababood labadaba:

- a. **Sababta koowaad:** Bulshada reer guuraaga ah, haddii degmadu habeenka ay geeddi ama hayaan guddoonsato uu ilmo u dhasho, waa loo negaan jirey, waxaana ilmaha haddii uu wiil yahay loo bixin jirey Negeeye. Sidoo kale haddii habeenkaa roob da’o, oo geeddigii ama hayaankii laga maarmo, roobkaasi inta badan wuxuu noqon jirey Negeeye sababay in la negaado. Sidaa si la mid ah Adeegga Negeeye wuxuu qofkii u soo safri lahaa Safaaradda ka baajinayaa safar dhib ku ahaa, dhaqaalana kaga bixi lahaa. Sababtaas ayaa adeeggan magaca Negeeye loogu wanqalay .
- b. **Sababta labaad:** Maadaama beryahan dambe cududrka COVID-19 dunida wada aafeeyey. Cid walibana yaraysay isu socodkii dadka, lana joojiyey kulan kasta oo aan muhiim ahayn. Safaaradda Soomaaliyeed ee Ankara waxay adeeggan u samaysay si loo yareeyo kulanka dadku isugu imanayaan Safaaradda gudaheeda ama dibaddeeda. Sidaa darteed adeeggani wuxuu qayb weyn ka qaadanayaa in dadku guryadooda ku negaadaan oo ay yareeyaan isu socodka iyo kulanka. Sow markaa adeeggani noqon maayo Negeeye?



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

13. Goorma ayaa la ii soo dirayaa adeegyada aan dalbaday?

Haddii dalabkaagu yahay nooca tooska “Online” lagu soo dalbado, marka uu dhinacaaga ka soo dhammaado, waxaa laguugu soo dirayaa jadwalkan:

- a. Haddii aad khidmadda adeegyada aad dalbatay soo bixisid, rasiidhkana soo dirtid (**ka hor 15:00 galabnimo**). Warqadahaaga ama adeegyadaada waxaa lagu soo dirayaa maalinta ku xigta gelinka hore.
- b. Haddii aad khidmadda adeegyada aad dalbatay soo bixisid, rasiidhkana soo dirtid (**ka dib 15:00 galabnimo**). Waxaa lagu soo dirayaa galabtaa maalinteeda labaad.
- c. Sabti iyo Axad dalka Turkey lagama shaqeyo. Sidaa darteed waxba la soo dirayo. Waxaa la mid ah maalmaha kale ee dalkani fasaxa yahay.

14. Adeegyada aan dalbaday sidee la iigu soo dirayaa?

Isticmaaluhu isaga ayaa masuul ka ah in uu soo qorto cinwaanka ama addresska saxda ah ee uu degganyahay. Safaaraddu waxay warqadahaaga ku soo diraysaa cinwaanka aad soo gelisay **Adeegga Negeeye** oo keliya. Ma aqbali doonto cinwaan ama address aad Safaaradda ugu soo gudbisey WhatsApp, email ama telefoon ama si kale.



Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ankara, Turkey

15. Sidee u isticmaalaa adeegga Negeeye?

Adeegga Negeeye waxaa loo dhisay hab qof waliba u adeegsan karo, isaga oo aan u baahan in cidi ka caawiso. Waxaad keliya oo aad u baahantahay in aad akhridid qoraalada far Soomaaliga ku qoran ee degalkan ku jira. Sidoo kalana aad daawatid muuqaallada loogu talo galay in ay kaa caawiyaan isticmaalka Adeegga Negeeye, oo aad iyagana degalkan ka dheehan kartid:

Cinwaanka Adeegga Negeeye: <https://ankaraemb.mfa.gov.so/Negeeye.aspx>

Caawiyaha: WhatsApp Number (Fariin keliya): +90 537 640 65 41

Cillad-bixiyaha WhatsApp Number (Fariin keliya): (+90 534 593 39 90)

16. Adeegga Negeeye talo ma ku darsan karaa?

Haa, taladaadu waa noo muhiim, fadlan wixii talo iyo toosin ah noogu soo dir email ka rasmiga ah ee Adeegga Negeeye oo ah adeegga.negeeye@gmail.com

17. Afeef:

Qormooyinka ku saabsan Adeegga Negeeye ee Safaaradda, sida *Xeerka Isticmaalka ama Su'aal iyo Jawaab* iyo kuwa kale, waxaa suurtagal ah in wax lagu soo kordhiyo, waxna laga beddelo. Sidaa awgeed, fadlan mar walba kala deg bogga Adeegga Negeeye qormooyinkii ugu dambeeyey.

<<< Dhammaad >>>